

## **DCSD Waxay U Dabaaldegtaa Maalinta Mahad celinta Shaqaalaha iyo Dabaaldegayada ay ka Buuxaan Mahadnaqa iyo Deeqsinimada**

Xiliga Jimcaha, Oktoobar 6, Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) wuxuu ku baraarugay farxad iyo dabaaldagyo maadaama maamulka xafiiska Degmada iyo shaqaalaha ay booqdeen dhammaan 138 dugsiyo iyo xarumo si ay u muujiyaan mahadnaqooda ku saabsan *Maalinta Mahadnaqa Shaqaalaha!* Munaasabadaan gaarka ah, oo ku soo beegantay Nasiinyada Deyrta oo maalinta hormarinta ardayda iyo xirfadlaha ee shaqaalaha, waxay marqaati u aheyd ka go'naanta DCSD ee ay ku aqoonsaneyso iyo ugu mahadcelineyso shaqaalahooda daacada iyo ay ka go'antahay.

Laakin damaashaadka halkaas kuma dhamaan. Darawalada baska iyo kormeerayaasha ayaa u dabaaldagay Tallaadada, Oktoobar 10, maadaama ay fasax ahaayeen Jimcaha, hubinta in shaqaale walboo qiimo leh waa la sharfay.

Tilmaamta gaarka ah ee maalinta waxay aheyd ka go'naanta degmada ee shaqaalahooda ka soo laabanayo sannadaha dugsiga ee 2022-2023. Waxaa lagu abaalmariyay daacadnimadooda oo dhammaan dhiirogelinta ceshadkooda \$2,000 badelkii ay ka ahaan laheyd \$1,000 simistarkiiba sida markii koowaad loo balan qaaday. Lacagahaan waxay u adeegaan sida calaamada mahadnaqa oo dadaalkooda adag iyo ka go'naantooda ardayda, qoysaska, jaalalka bulshada, iyo midba midka kale ee Gobolka DeKalb.

Intii lagu jiray dabaaldegayadaan, macalimiinta cusub ee DCSD oo 2023-2024 ayaa helay qeybtii ugu horeysay ee gunado-magdhawgooda, taasoo aqoonsato xamaasadooda iyo ka go'naantooda ay ku qaabeynayaan mustaqbalka degmada.

Kooxda sadexaad ee shaqaalaha DCSD ee la sharfay waxay ahaayeen dhammaan xubnaha cusub ee shaqaalaha sannad dugsiyeedka 2023-2024. Waxay heleen "bacaha hadiyada" gaarka ah ee ka buuxo alaabo badan, oo ay ku jiraan kaararka hadiyada, faylalka, koofiyadaha, iyo qalimaanta, kuwaasoo u adeega sida calaamad muujineysa ku soo dhaweynta dhammaan dadka cusub qoyska DCSD.

Labadaan maalmood waxaa ka buuxay dhoola cadeyn, qosol, iyo mahad naq qalbiga dareemo. Maalinta Mahadnaqa Shaqaalaha waa xasuusin sannadle ah oo in DCSD ay qiimeyso oo ay qadariso dadaalka iyo ka go'naanta shaqaalaheeda oo dhan, taasoo ka dhigaysa meel fiican oo lagu guuleysto, wax lagu barto, oo lagu sameeyo saameyn waarta.

DCSD waxay sii wadaa inay ku hogaamiso tusaale, iyadoo tusineysa muhiimada ay leedahay kobcinta jawi taageero iyo mahadnaq u leh shaqaalaheeda, kuwaasoo door muhiim ah ka ciyaara qaabeynta mustaqbalka ardayda iyo bulshada.

Riix linkiyada hoose oo muuqaalada Maalinta Mahadnaqa Shaqaalaha 2023:

- Sawirrada Degmadoo dhan laga bilaabo Jimcaha, Oktoobar 6: <https://flic.kr/s/aHBqjAXt3k>
- U Dabaaldaga Darawalka Baska iyo Kormeeraha Baska ee Tallaadada, Oktoobar 10: <https://flic.kr/s/aHBqjAY4aN>